**War** saxaafadeed

# Maalgalinta caafimadka dumarka iyo caruurta

Maayo 03, 2024 Su'aalaha warbaahinta

## Dowladda Alberta waxay $26 milyan ku maalgalinaysaa balaarinta Barnaamijka Baaritaanka Caafimaadka ee Caruurta Dhalanaysa ee Alberta (Alberta Newborn Screening Program) iyo horumarinta cilmibaarista caafimaadaka dumarka ee Alberta.

Ayada oo dowladda Alberta ay sii wadayso dadaalada ay ku hormarinayso natiijooyinka caafimaad ee dhammaanba dadka reer Alberta, haddana mid kamid ah dadaalada muhiimka ah ayaa ah kan ku saabsan caafimaadka iyo badqabka dumarka iyo caruurta. Dowladda Alberta waxaa ka go'an horumarinta caafimaadka dumarka waxayna kordhinaysaa maalgalinta cilmibaarista, u ololeynta iyo daryeelka caafimaadka dumarka.

Ayada oo adeegsanaysa Miisaaniyadda 2024, dowladda Alberta waxay gudaysaa balantii ay doorashada ku gashay oo ah inay $20 milyan labada sanno ee soo socota ku taageerto laba urur oo fulinaya cilmibaarista lagama maarmaanka ah ee looga dan leeyahay wax ka qabashada gaabiska muddada dheer ka jiray fahamka iyo wax ka qabashada tabashooyinka caafimaadka dumarka.

"Qoysas caafimaad qabaa waxay aasaas u yihiin bulsho caafimaad qabta. Maalgashiga caafimaadka dumarka iyo caruurta markaas dhalanaysaa waxaa ka dhalanaya natiijo wanaagsan iyo xasilooni maskaxeed. Waxaan khubarada siinaynaa agabyada ay arrimo badan oo caafimaadka ku saabsan wax uga qaban doonaan dhawaan, taasina waxay muhiim u tahay waalidiinta iyo nidaamkeena daryeelka caafimaadka hadda iyo mustaqbalkaba."

*Danielle Smith, Guddoomiyaha*

"Guddoomiyaha gobolku wuxuu i siiyay waajibaad shaqo oo cad si aan u hormariyo caafimaadka dumarka iyo caruurta Alberta. Hadafkeenu waa inaan sii wadno inaan

hoggaamino barnaamijyada iyo cilmibaarisyada ku saabsan caafimaadka dumarka iyo caruurta. Maalgalinadaanu waxay isbadal la taaban karo ku yeelan doonaan la tacaalidda arrimaha caafimaadka ee saamaynta ku leh dumarka, waxay hagaajinayaan badqabka guud waxayna xaqiijinayaan in qof kasta oo reer Alberta ah uu baraare gaaro, ayada oo aan loo eegayn da'diisa ama marxaladda uu nolosha ka maraayo."

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

Waxaa maalgalinta $20 milyan ah kamid ah $10 milyan oo laba sanno baxaysa si loo abuuro Alberta Women's Health Foundation Legacy Grant si loogu taageero cilmibaaris ku saabsan kansarka ku dhaca ilmagaleenka afkiisa, cudurada wadnaha iyo xaaladaha kale ee caafimaadka dumarka ee caadiga ah. Intaa waxaa dheer, maalgalintu waxay caawinaysaa shaqaalaysiinta cilmibaareyaal sare oo gobolku helo waxayna caawinaysaa dadaalada ololeyeed iyo wacyigalinta.

Mu'assasada Caafimaadka Calgary(Calgary Health Foundation) waxay bulshada reer Calgary oo dhan u shaqaynaysay in ka badan 25 sanno, ayada oo siinaysay kaalmo ay usoo marinaysay barnaamijyada iyo cilmibaarista caafimaadka. Mu'assasadu waxay sidoo kale heli doontaa maalgalin loogu tala galay oo $10 milyan labada sanno ee soo socota si ay u fuliso barnaamijyada lagu maalgaliyo cilmibaarista kansarka, oo ay la socdaan hidiseyaal sida samaynta goobta caafimaadka ee degdega loo heli karo iyo mashaariicda caafimaadka misgaha ee Calgary. Hindiseyaashu waxay horseedi doonaan horumarinta daryeelka caafimaadka waxayna sii hagaajinayaan baahiyaha gaarka ah ee boqolaal kun ee dumarka ah ee Alberta ku nool.

**Barnaamijka Baaritaanka caafimadaka Caruurta dhalanaysa ee Alberta**

Sannad walba, tiro yar oo caruurta Alberta ah ayaa ku dhasha xaalad cillado caafimaad kuwaasoo keeni karta xaalad caafimaad oo adag ama xaataa dhimashoba. Ogaanshaha iyo daaweynta xiliga hore ah ee xaaldahaan waxay muhiim u yihiin koritaanka caafimaadka leh waxayna si weyn u dhimaysaa heeraka dhimashada iyo xanuunada caruurta ku dhaca.

Barnaamijka baaritaanka caafimaadka ee buuxa waxtarkana leh wuxuu lagama maarmaan u yahay xaqiijinta caafimaadka, daaweynta iyo taageerada caruurta iyo qoysaskooda. Branaamijka Baaritaaka caafimaadka Caruurta Dhalanaysa ee Alberta wuxuu hadda baaraa 22 xaaladood wuxuuna xaqiijiyaa in dhammaanba caruurta la baaray ee qaba cadurada la daaweyn karo ay helaan qiimayn dhanka caafimaadka ah, baaritaan cudurada ah iyo daaweyn dhakhso ah hadday lagama maarmaan noqoto.

Ayada oo adeegsanaysa Miisaaniyadda 2024, dowladda Alberta wxaay hagaajin doontaa Barnaamijka Baaritaanka caafimaadka Caruurta Dhalanaysa ee Alberta ayada oo $6 milyan ku maalgalinaysa si ay ugu soo kordhiso afar xaaladood oo dheeraad ah, taasoo wadar ahaan ka dhigaysa 26, ayada oo buuxinaysa ballan kale oo ay qaaday xiligii doorashada. Afarta xaaladood ee cusub waa: xanuunada loo yaqaano congenital cytomegalovirus, argininosuccinic aciduria, guanidinoacetate methyltransferase iyo mucopolysaccharidosis nooca 1. Balaarintanu waxay barnaamijka hadda jira ka dhigaysaa mid kamid ah kuwa ugu balaaran Canada waxayna Alberta ka dhigaysaa gobolkii ugu horeeyay oo baara afartaan xaaladood, taasoo horseedaysa hagaajinta heerka badbaadada dhalaanka.

**Xaqiiqooyinka kooban**

- Miisaaniyad sannadeedka 2022-23, Barnaamijka Baaritaanka caafimaadka caruurta markaas dhalanaysa ee Alberta wuxuu si guul le u baaray 99.2 boqolkiiba caruurta Alberta ku dhalata waxayna 98.95 boqolkiiba kusoo gudbisay natiijada caruurtaas 10 maalmood gudahood.
  - Ka qaybqaadashada guud ee barnaamijku waa mid waafaqsan kii sanadkii hore (99.27 boqolkiiba).
- Afarta xaaladood ee baaritaanka cusub ah waxaa kamid ah:
  - **congenital cytomegalovirus:** Congenital cytomegalovirus (CMV) waa xaalad ilmaha ku keeni karta arrimo caafimaad oo fara badan, waxaana kamid ah dhagoolnimo, waxyeelo aragga ah, naafanimo garaadka ah iyo dib u dhacyo dhanka koritaanka ah.
  - **argininosuccinic aciduria:** Argininosuccinic aciduria waa cillad la kala dhaxlo oo dhif iyo naadir ah taasoo leh astaamo ay kamid noqon karaan cunto xumo, matag, tabar darro, dib u dhacyo koritaanka ah, suuxdimo iyo kooma. Daaweyntiisu waxay inta badan ku taxaluqdaa cunto iyo daawooyin u gara ah si loo ilaaliyo heerarka ammonia-da.
  - **ciladda guanidinoacetate methyltransferase:** Ciladda Guanidinoacetate methyltransferas waa xaalad la iska dhaxlo oo dhif iyo nadair ah taasoo horseedi karta dib u dhacyo dhanka koritaanka ah, suuxdimo iyo dhibaatooyin kale.
  - **mucopolysaccharidosis nooca 1:** Mucopolysaccharidosis type 1 (MPS I) waa cillad la iska dhaxlo oo dhif iyo naadir ah taasoo sababi karta cillado lafaha ah, barar ku yimaada unugyada jirka, dhibaatooyin wadnaha iyo neefmareenka ah, naafanimo garaadka ah, iyo beelista aragga iyo maqalka.

**Lifaaqyada la xiriira**

- Guddoomiyaha gobolka Danielle Smith 2023 waraaqda waajibaadka shaqada (La soo saaray Luulyo 18, 2023)
- Barnaamijka Baaritaanka caafimadaka Caruurta dhalanaysa ee Alberta
- Mu'assasada caafimaadka Calgary
- Mu'assasada Caafimaadka Dumarka Alberta

# Su'aalaha warbaahinta


## Sam Blackett

587-589-6048
Xoghayaha Saxaafada, Guddoomiyaha Xafiiska

## Andrea Smith

780-918-4284
Xoghayaha Saxaafada, Health